

FOOM OGGOLAANSHO EE GAABAN SI AAD UGA QAYBGASHID CILMI-BAARISTA
Ee loogu talagalay Daraasadaha lagu sameeyay u hogaansanaanta Xeerka Guud ee dib loo beddelay

LAMBARKA KAFAALO QAADAHA:

KAFAALO QAADAHA:

BAARAHA:

24 SAACADOOD. LAMBARKA TALEEFANKA:

Adeegsiga “adiga” ee dhammaan dukumintigan waxaa loola jeedaa ka-qaybgalaha cilmi-baarista. Waxaa sidoo kale loola jeedaa qofka sharci u leh inuu bixiyo ogolaansho qof inuu ka-qaybgalo daraasaddan cilmi-baarista ah.

Oggolaanshaha si looga Qaybgalo Daraasadda Cilmi-baarista

Waxaa lagu weydiisanayaa inaad kaqaybqaadato daraasad cilmi-baaris ah. Fadlan qaado wakhtigaaga si aad go'aankaaga u gaarto oo kala hadal qoyskaaga iyo asxaabtaada.

Kahor intaadan oggolaan ka-qeybgalka, baaraha waa inuu kuu sheegaa:

- 1) Macluumaadka muhiimka ah ee ku saabsan daraasaddan, taasoo ah in marka hore lagu soo bandhigo, ka hor inta wax macluumaad ah ee kale aan la bixin;
- 2) Ujeedooyinka, hab-raacyada, iyo muddada cilmi-baarista;
- 3) Wixii hab-raacyo ah oo tijaabo ah;
- 4) Wixii ah halisyo macquul ah oo la falin karo, raaxo-darooyinka, iyo faa'iidooyinka cilmi-baarista;
- 5) Wixii ah hab-raacyo kale ama daaweyn kale oo laga yaabo inay waxtar layhiin;
- 6) Sida loo joohtayn doono qarsoodiga iyo sida macluumaadkaaga caafimaad loo ilaalin doono; iyo
- 7) Haddii macluumaadkaaga laga bixiyey wax lagugu aqoonsan karo ee ah (ka saarista faahfaahinta ee suurtagal ka dhigaya in lagu aqoonsado) macluumaadka khaaska ah ama sambalada/nomuunooyinka jirka ah (biospecimens) (tusaale ahaan, kaadida, dhiigga, nudaha) ee loo ururiyey daraasaddan loo isticmaali karo daraasadaha cilmi-baarista ee mustaqbalka iyadoon oggolaansho dheeraad ah la helin.

Halkii ay khusayso, Baaraha waa inuu sidoo kale kuu sheegaa waxyaalaha ku saabsan:

- 1) Wixii ah magdhow ama daaweyn caafimaad ee la heli karo haddii uu dhaawac dhaco;
- 2) Suurtagal-nimada ah inay jiri karaan halisyo aan la saadaalin karin;
- 3) Xaaladaha uu baaraha u joojin karo ka-qaybgalkaaga;
- 4) Wixii ah kharash kugu soo dalici karo adiga;
- 5) Waxa dhacaya haddii aad go'aansato inaad joojiso ka-qaybgalka;
- 6) Goorta lagu sheegi doono waxa ku saabsan natiijooyinka cusub ee saameyn kara rabitaankaaga ee ka-qaybgalka;

- 7) Inta qof ee ku jiri doona daraasadda;
- 8) Haddii sambalada/namuunooyinka (biospecimens) (xitaa haddii laga bixiyey wax lagugu aqoonsan karo) laga yaabo in loo isticmaali karo faa'iido ganacsi iyo haddii lagula wadaagi doono faa'iidada;
- 9) Haddii lagu siin doono natiijada cilmi-baarista ee caafimaad ahaan khuseeya, oo ay ka mid yihiin natiijada cilimi-baarista ee shakhsi ahaaneed, oo hadday saas tahay, maxay yihiin xaaladaha sidaa hoos yimaada;
- 10) haddii uu ama laga yaabo in cilimi-baarista (haddii la ogyahay) uu ka mid ahaan doono taxanaha DNA-ga (genome) oo dhan; iyo
- 11) Loogu talagalay tijaabooyinka caafimaadeed: Faahfaahin ku saabsan tijaabadan caafimaadeed ayaa laga heli doonaa www.ClinicalTrials.gov, sida looga baahan yahay Sharciga Mareykanka. Websaydka kuma jiri doonaan macluumaad lagugu aqoonsan karo. Ugu badnaan, websaydka waxa ku jiri doona soo koobid ah natiijoooyinka. Waxaad wax ka raadin kartaa Websaydka wakhti kasta.

Haddii aad oggolaato inaad ka-qeybgasho, waxaa lagu siin doonaa nuqul saxiixan oo dukumintigan ah iyo nuqul ka mid ah foomka oggolaanshaha oo luqadda Ingiriisiga ah ee daraasadda.

Waxaad nala soo xiriiri kartaa wakhti kasta oo aad qabtid su'aalo ku saabsan daraasadda ama dhaawac la xiriira cilmi-baarista.

Waxaad sidoo kale la xiriiri kartaa Advarra IRB. Guddiga dib u-eegida hay'adaha/machadyada (institutional review board, IRB) waa guddi madax-bannaan oo loo sameeyay inuu caawiyo ilaalinta xuquuqda ka qaybqaatayaasha cilmi-baarista. Haddii aad qabtid wax su'aalo ah oo ku saabsan xuquuqda ama xuquuqda ilmahaaga dhawaan dhashay aad u leedihiin idinkoo ah ka-qaybgalayaasha cilmi-baarista, iyo/ama haddii aad qabtid walaacyo ama cabashooyin la xiriira daraasaddan cilmi-baarista ah, kala xiriir:

- Boostada:
Study Subject Adviser
Advarra
6940 Columbia Gateway Drive, Suite 110
Columbia, MD 21046
- ama ka wac **qadka lacag la'aanta ah:** 877-992-4724
- ama kala xiriir **imaylka:** adviser@advarra.com

Kaqaybgalkaaga daraasaddan cilmi-baarista ah waa ikhtiyaari, lagumana ciqaabi doono mana lumin doontid wax manfacyo/faa'iido ah haddii aad diido inaad ka-qaybqaadato ama aad go'aansato inaad joojiso Ka-qaybgalka.

Saxiixida dukumiintigan waxay ka dhigan tahay in daraasadda cilmi-baarista ah, oo ay ka mid yihiin macluumaadka kor ku xusan, laguugu sharaxay hadal ahaan, iyo inaad si ikhtiyaari ah u oggolaanayso inaad ka-qaybqaadato:

Diiwaangelinta Oggolaanshaha (haddii ay khusayso)

Qofka sameynaya daraasadan cilmi-baarista ah wuxuu sharaxay waxa igu dhici doona hadii aan ka-qeybqaato daraasadan cilmi-baarista ah. Saxiixayga hoos wuxuu ka dhigan yahay inaan doonayo inaan ku jiro daraasaddan cilmi-baarista. Waxaan go'aansan karaa inaan ka-qeybqaadan daraasaddan cilmi-baarista ah haddii aanan rabin oo aysan waxba igu dhici doonin haddii aan go'aansado inaan rabin inaan ka-qaybqaato.

Saxiixa Ka-Qayqaataha

Taariikhda

Diiwaangelinta Oggolaanshaha:

Magaca Ka-qaybqaataha oo Far Waaweyn ku Qoran

Saxiixa Ka-qaybqaataha

Taariikhda

Wakiilka Sharci u leh Oggolaanta (markii ay khusayso):

Magaca oo ku Qoran Far Waa weyn ee Wakiilka Sharci u leh Oggolaanta

Saxiixa Wakiilka Sharci u leh Oggolaanta

Taariikhda

Loo baahan yahay:

Saxiixa Tujumaanka/Maqaatiga

Taariikhda

KU DARISTA DARAASADDO IKHTIYAARI AH (HADDII AY KHUSAYSO)

Waxaa lagaa codsanayaa inaad ka-qeybqaadato qaar ah daraasaddo ikhtiyaari ah. Haddii aad go'aansato inaad ka-qaybqaadan wax ah daraasadaha ikhtiyaariga ah, weli waad ka-qaybqaadan kartaa daraasadda cilmi-baarista assaasiga ah. Fadlan qaado wakhtigaaga si aad go'aankaaga u gaarto oo kala hadal qoyskaaga iyo asxaabtaada.

Ka-qaybgalkaaga daraasadaha ikhtiyaariga ah ee cilmi-baarista waa ikhtiyaari, lagumana ciqaabi doono mana lumin doontid wax manfacyo/faa'iido ah haddii aad diido inaad ka-qaybqaadato ama aad go'aansato inaad joojiso Ka-qaybgalka.

Fadlan sheeg haddii aad rabto inaad ka-qaybqaadato daraasadaha cilmi-baarista ikhtiyaariga ah.

Daraasadda Ikhtiyaariga ah ee 1: _____

- Ma khuseyso
- Haa Harfaha koowaad ee magacaaga _____ Taariikhda
- Maya Harfaha koowaad ee magacaaga _____ Taariikhda

Daraasadda Ikhtiyaariga ah ee 2: _____

- Ma khuseyso
- Haa Harfaha koowaad ee magacaaga _____ Taariikhda
- Maya Harfaha koowaad ee magacaaga _____ Taariikhda

Daraasadda Ikhtiyaariga ah ee 3: _____

- Ma khuseyso
- Haa Harfaha koowaad ee magacaaga _____ Taariikhda
- Maya Harfaha koowaad ee magacaaga _____ Taariikhda

Daraasadda Ikhtiyaariga ah ee 4: _____

- Ma khuseyso
- Haa Harfaha koowaad ee magacaaga _____ Taariikhda
- Maya Harfaha koowaad ee magacaaga _____ Taariikhda

Daraasadda Ikhtiyaariga ah ee 5: _____

- Ma khuseyso
- Haa Harfaha koowaad ee magacaaga _____ Taariikhda
- Maya Harfaha koowaad ee magacaaga _____ Taariikhda

Daraasadda Ikhtihaariga ah ee 6: _____

- Ma khuseyso
- Haa Harfaha koowaad ee magacaaga _____ Taariikhda
- Maya Harfaha koowaad ee magacaaga _____ Taariikhda

Daraasadda Ikhtihaariga ah ee 7: _____

- Ma khuseyso
- Haa Harfaha koowaad ee magacaaga _____ Taariikhda
- Maya Harfaha koowaad ee magacaaga _____ Taariikhda

Daraasadda Ikhtihaariga ah ee 8: _____

- Ma khuseyso
- Haa Harfaha koowaad ee magacaaga _____ Taariikhda
- Maya Harfaha koowaad ee magacaaga _____ Taariikhda

Daraasadda Ikhtihaariga ah ee 9: _____

- Ma khuseyso
- Haa Harfaha koowaad ee magacaaga _____ Taariikhda
- Maya Harfaha koowaad ee magacaaga _____ Taariikhda

Daraasadda Ikhtihaariga ah ee 10: _____

- Ma khuseyso
- Haa Harfaha koowaad ee magacaaga _____ Taariikhda
- Maya Harfaha koowaad ee magacaaga _____ Taariikhda



TRANSLATION CERTIFICATE



SPONSOR NAME:	Advarra
PROTOCOL NUMBER:	Advarra
ADVARRA PRO NO.:	Advarra
ELECTRONIC FILE NAME:	Advarra Short Form to Participate in Research - Revised Common Rule - Template ENGLISH v010319
DATE OF TRANSLATION:	05-Oct-2020
SOURCE LANGUAGE:	English (United States)
TARGET LANGUAGE:	Somali (Somalia)
NAME OF TRANSLATION COORDINATOR:	Yukimi Harada
TRANSPORT NO.:	ADV-12604
TRANSPERFECT JOB ID:	US0807977

TransPerfect is globally certified under the standards ISO 9001:2015, ISO 17100:2015, and ISO 18587:2017. This Translation Certificate confirms the included documents have been completed in conformance with the Quality Management System documented in its ISO process maps and are, to the best knowledge and belief of all TransPerfect employees engaged on the project, full and accurate translations of the source material.

TRANSPERFECT TRANSLATIONS INTERNATIONAL, INC.
TRANSPERFECT GLOBAL HQ
1250 BROADWAY, 7TH FLOOR, NEW YORK, NY 10001